



## (Allaha u naxariisto nin wanaag badan hadii uu wax iibinaayo, haduu wax soo gadanaayo, iyo haduu gar naqsanaayoba.)

Jaabir Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay scw uu yiri: (Allaha u naxariisto nin wanaag badan hadii uu wax iibinaayo, haduu wax soo gadanaayo, iyo haduu gar naqsanaayoba.)

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu scw wuxuu naxariis ugu duceeyey qof kastoo sahan oo deeqsiya oo sakhi ah markuu wax iibinaayo. Kuma adkeeyo sicirka qofka wax ka iibsanaya, wuxuuna kula dhaqmaa akhlaaq fiican. waa qof sahan oo deeqsi ah oo sakhi ah oo markuu wax iibsanayo ma bakhso mana yareeyo qiimaha badeecada. Waa qof sahan oo deeqsi ah oo sakhi ah markuu dayntiisa, waydiisanayo, kuma adkeeyo faqiirka iyo kan baahan, balse wuxuu u waydiiyaa si fudud oo naxariisi ku jirto, wuuna ka sugaa kaan haysan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3716>

